



Xilliga Shaashadda iyo Caruurta Aadka u Yaryar

Waxa jira waxyaabo badan oo aad sameeyn karto si aad uga caawiso caruurtaada caafimaadka iyo u diyaargarooowga iskuulka. Dhaqaatiirtu waxay ku talliyaan in carruurta ka yar 2 jirku **AANAY** waqtina fiirsan shaashad (television, kombuyuutarda, ciyaaraha fiidiyaha, telefoonada). Xilliga shaashadda ee carruurta yaryari waxa uu ka qaadayaa waxbarashadii ay u baahnaayeen si ay ugu diyaargaroooban iskuulka.

Carruurta dhalaanka ee korta ee waxbarta shaashad la'aantu:

- Hurdo fiican ayay seexdaan.
- Dhaqso ayay hadalka u bilaabaan.
- Heli doonaan waqti dheeraad ah si ay ula falgalaan waalidiinta, xubnaha qoyska iyo dadka daryeelaya hawlaha kor u qaadaya horumarka maskaxda (sida hadalka, ciyaaro, heeso, iyo wada akhriska buugaagta)
- Waxay diyaar u yihiin inay iskuulka bilaabaan.
- Iskuulka ku fiicnaadaan.
- Carruurta kale si fiican ula qabsadaan.
- Helaan waqti dheeraada oo ay ku cayaaraan.
- Ku fiicnaadaan xallinta dhibaatooyinka.
- Yeeshaan cunto cunis caafimaad leh. Arkaan xayeysiin yar oo ah cuntada xun.